



Raadinta aqoonsi cusub oo uu leeyahay Dugsiga Sare ee Franklin oo soo saaray 6 musharax

Guddiga loo xilsaaray in ay soo helaan aqoonsi cusub oo uu leeyahay Dugsiga Sare ee Franklin ayaa la timid liiska lix magacyada astaanta cusub oo loogu talagalay in ay bulshada dugsi ugu tixgelinta siiso. 19 xubnood oo ka tirsan Guddiga Aqoonsiga Astaanta ee Franklin – oo ay ku jiraan arday, shaqaale, arday hore u qalin jebisay, xubnaha qoyska ka tirsan iyo xubnaha bulshada ka tirsan – ayaa aqoonsaday magacyadan suurtagalka ah:

- Ambassadors
- Chargers
- Falcons
- Firs
- Lightning
- Thunderbolts

Franklin waxay ku jirtaa beddelaada magaca astaanta ‘mascot’ sababta oo ah aqoonsiga ay hadda leedahay ee, Quakers, waxaa la ogaaday in uu jebinayo siyaasadda degmada oo mamnuucaysa magacyada xiriirka la leh urur diimeed.

Guddigu waxay ra’yi ururin ka qaadaysaa wax daneeyayaasha Franklin si loo go’aamiyo ka ay doorbidayaan lixda la kala dooranayo, iyada oo ka la dooranayo qoraal ahaan lagu dhiiban karo. Guddigu waxay leedahay laba kulan oo la qorsheeyay Abriil si loola yimaado talada u dambeysa si loogu diro Kormeeraha guud Guadalupe Guerrero si uu isagu dib u eegis ugu sameeyo. Kormeeraha wuxuu magaca la soo jeediyay u gudbin doonaa Guddiga Waxbarashada marka la gaaro Maajo, iyada oo cod qaadista kama dambeysta ee Guddiga uu imaanayo Juun.

Marka magaca cusub la aqoonsado, isbedelo ayaa la sameyn doonaa si loo cusbooneysiyo waxyaabaha ka jira dugsi ee muujinaya magaca Quakers. Degmadu waxay haysan doontaa ilaa Juun 30, 2020 si ay u sameyso isbedeladani.

Isbeddelka waxaa keenay waalidiin laba cabasho u gudbiyay degmada muddo saddex sano ah. [Guddigu waxay qaraar ku ansixisay](#) kulankeedii Maajo 14, iyada oo ku amraysa degmada in ay bedesho astaanta ‘mascot’ ee Franklin. Guddigu waxay sidoo kale ansixisay qorshaha ka qayb galinta bulshada kaasi oo dhaqan gal ahaa tan iyo Janaayo 2019, markaasi oo Guddiga Aqoonsiga Astaanta ay bilaabeen kulamo dadweyne oo taxane ah.

Si aad u ogaato waxyaabo dheeraad ah oo ku saabsan nidaamka, fiiri [Website-ka Guddiga Aqoonsiga Astaanta ee Franklin](#).